

Madaxweynaha Somalia Mudane Xasan Sheekh Iyo Dhiggiisa Dalka Ereteriya Oo Heshiis Is-Afgarad Kala Saxiixday

Muqdisho, Luulyo 12, 2022: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo booqasho rasmi ah oo qaadatay afar maalmood ku joogay waddanka Ereteriya ayaa dalka dib ugu soo laabtay.

Booqashada Madaxweynaha ayaa salka ku haysay xoojinta xiriirka diblomaasiyadeed ee labada dal iyo u kuur-galidda xaaladda guud ee ay ku sugan yihiin ciidamada Soomaaliyeed ee tababbarka u jooga dalkaas.

Labada Madaxweyne ayaa gunaanadkii booqashada kala saxiixday heshiis is af-garad oo taabanaya dhinacyo kala duwan. Qodobbada heshiiska is af-garad ee ay labada dowladood kala saxiixdeen ayaa ka kooban qodobbada hoos ku xusan:

1. Adkaynta xiriirka labada shacab oo ay ku jiraan qurbajoogta labada dal.
2. Xoojinta wada-shaqaynta siyaasadeed iyo diblomaasiyadeed si loo ilaaliyo, loona horumariyo danaha labada qaran.
3. Ballaarinta iskaashiga dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada iyada oo mudnaan gaar ah la siinayo ganacsiga, maalgashiga, biyaha, beeraha, kalluumaysiga, caafimaadka iyo waxbarashada.
4. Sare u qaadidda iskaashiga dhinaca dhaqanka, suugaanta, ciyaaraha iyo sayniska.
5. Adkaynta wada-shaqaynta ilaalinta iyo horumarinta deegaanka iyo wax ka qababashada saamaynta masiibooyinka dabiiciga ah iyo cudurrada faafa.
6. Kor u qaadidda iskaashiga difaaca iyo amniga si loo ilaaliyo nabadda, xasilloonida iyo amniga.
7. In si wadajir ah looga shaqeeyo horumarinta iskaashi, isdhexgal dhaqaale iyo xiriir wanaagsan oo ay yeeshaan dalalka Geeska Afrika.

Dhinaca kale, Madaxweynaha ayaa intii uu joogay dalka Ereteriya waxa uu booqday xeryaha ay tababbarrada ku qaataan ciidamada kala duwan ee dalkaas jooga, isaga oo ugu dambayntiina booqday magaalada Massawa oo ay tababar u joogaan cutubyo ka tirsan Ciidamada Badda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA HASSAN SHEIKH MOHAMUD AND THE PRESIDENT OF ERITREA SIGN A MEMORANDUM OF UNDERSTANDING

Mogadishu, 12 July 2022: The President of the Federal Republic of Somalia, **Hassan Sheikh Mohamud**, has returned to the country following a four-day official visit to the State of Eritrea.

The purpose of the President's visit was to strengthen diplomatic relations between the two countries and to assess the overall condition of Somali military personnel undergoing training in Eritrea.

At the conclusion of the visit, the two Presidents signed a **Memorandum of Understanding (MoU)** covering various areas of cooperation. The provisions of the Memorandum of Understanding signed by the two Governments include the following:

1. **Strengthening relations between the peoples of the two countries**, including their respective diaspora communities.
2. **Enhancing political and diplomatic cooperation** in order to protect and advance the interests of the two nations.
3. **Expanding economic and social cooperation**, with particular emphasis on trade, investment, water resources, agriculture, fisheries, health, and education.
4. **Promoting cooperation in culture, literature, sports, and science.**
5. **Strengthening cooperation in environmental protection and sustainable development**, as well as addressing the impacts of natural disasters and epidemic diseases.
6. **Enhancing defence and security cooperation** to preserve peace, stability, and security.
7. **Working jointly to promote cooperation, economic integration, and good relations among the countries of the Horn of Africa.**

In addition, during his stay in Eritrea, the President visited military training camps where various Somali forces are receiving training. He also visited the city of **Massawa**, where units of the **Somali Navy** are undergoing training.